



## **Biyahayga Ma Ammaan baa In la Cabbo?**

*Macluumaadka Milkiiliyaasha Guryaha Daadka Kadib*

**Milkiiliyaasha guryaha ee isticmaala biyaha la cabbo ee ka yimaada magaalo ama nidaamka kale ee biyaha dadweynaha:**

- Dhegeyso ogeysiisyada bulshada ee la xiriirta ammaanka biyahaaga.

**Milkiiliyaasha guryaha ee isticmaala biyaha la cabbo ee ceelal gaar loo leeyahay:**

- Ceelasha daadku maray waxa gaarey bakteeriya oo waxaa laga yaabaa in kimiko gaartey.
- Haddii loogu shakiyo in kimiko ay ku darsameen, wixii talo ah la xiriir unugga caafimaadka bulshada ee degaanka ama Waaxda Caafimaadka ee North Dakota. Tani waxay quseysaa, tusaale ahaan, haddii biyahaagu uu yeesho muuqaal aan caadi ahayn ama dhadhan kiimiko oo adag ama ur. Isticmaal biyaha dhalada ilaa iyo mas'uuliyiinta caafimaadka kuugula taliyaan in biyahaaaga cabiddiisa ay ammaan tahay.
- Haddii aanan looga shakin kimiko in aysan gaarin, jeermiska ka baabii oo baadha ceelasha daadka soo gaarey kadib markii daadku joogsado. La xiriir unugga caafimaadka bulshada ee degaanka ama Waaxda Caafimaadka ee North Dakota si ay tilmaamo gaar ah kuu siiyaan. Ilaa ay tijaabada ka muujiyaan in biyaha cabidda ku wanaagsan yahay, biyaha si wanaagsan isaga karkari oo xumbo haka yimaadeen ugu yaraan ilaa iyo hal daqiiqo. Ha qaboobeen kahor inta aadan isticmaalin. Sidoo kale biyaha dhalada ayaad isticmaali kartaa. Biyaha karkarsan ama kuwa dhalada ayaa loo isticmaali karaa cabbitaan, cunto karis, baraf laga sameysto, saxuunta lagu dhaqdo ama ilko cadeysi. Sii wad in aad isticmaasho biyaha karkarsan ama kuwa dhalada ilaa iyo baaritaanka muujiso in biyaha cabiddooda ay tahay kuwa ammaan ah. Maadaama walwal gaar ah ay jiraan dhanka carruurta yaryar, biyaha dhaladda kaliya isticmaal marka aad cuntada caruurta isku dareyso ama cuntada gasaceysan ee ilmaha yaryar ee aanan ubaahanayn in biyo lagu daro.

**Cabbida biyo wasaqeysan waxay sababi kartaa jiro.**

- Haddii aad xanuunsato kadib markaad cabbto biyo wasaqeysan, waa in aad raadsataa daryeel caafimaad. Calaamaddaha caadiga ee xanuunka biyo aan ammaan ahayn waxaa ka mid ah calool xanuun, matag, shuban, qandho, jiiraggo iyo madax-xanuun.
- Caruurta (gaar ahaan dhalaanka), dadka da'da ah, iyo kuwa horey u qabey xaaladdo caafimaad-daro ama qabey nidaam difaaca jirka oo liita ayaa qatar wayn u ah in ay la yimaadaan dhibaato caafimaad daro. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in ay helaan daryeel caafimaad haddii calaamadaha ay noqdaan kuwo ka sii dareysa ama aan raysanayn.

Macluumaad intaa ka sii badan, ka wac Waaxda Caafimaadka ee North Dakota 701.328.2372.